

Wax ka baro Macluumaadka Kharashka Shacabka Gunnada Shacabka, Socdaalka, iyo Qoyskaaga

War ku saabsan talada isbaddalada shuruucda la xidhiidha isticmaalka gunnada shacabka iyo arjiyada socdaalka waxay dadka badan oo soo-galayti ah iyo qoysaskoodu ka warwarsan yihiin galaangal u yeelashada barnaamijka shabakadda badbaadada sida Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah, SNAP (kaadhahka cuntada), Caymiska Caafimaadka Oregon, iyo kuwa kale.

Kharashka shacabka ma khuseeyo gunnooyin badan iyo qaybo badan oo dadka soo-galaytiga ah. Ha ka tanaasulin gunnooyin muhiim ah oo ay qoyskaagu u baahan yihiin, sida kaalmada raashinka iyo daryeelka caafimaadka, taas oo ku salaysan kutiri kuteen iyo cabsi. Waa inaad macluumaadka haysaa si aad doorashada saxda ugu samayn karto naftaada iyo qoyskaaga.

Macluumaad Gaaban oo ku saabsan Isbaddalka Lagu Taliyay ee Kharashka Shacabka:

1. Kharashka Shacabka ma khuseeyo cid walba.

Wax ka ogow sida adiga uu sharcigu kuu khuseeyo.

2. Ha uga tanaasulin adeegyada qoyskaagu u baahan your yihiin wixii baqi ah. Macluumaad hel kahor inta aanad go'aanka gaadhin.

3. Kaligaa ma tihid.

looyar ku takhasusay socdaalka, bixiyayaasha adeegga sharciga, iyo saaxiibada bulshada ayaa diyaar kuugu ah inay kaaga jawaabaan su'aalahaaga iyo inaad go'aanka saxda ah u gaadho qoyskaaga:

- Kala xidhiidh looyarka socdaalka ku takhasusay wixii su'aalo ah ee ku saabsan ikhtiyaarada laanta socdaalka iyo gunnooyinka shacabka. Waxaad kaalmo sharci ka heleysaa halkan oregonimmigrationresource.org/resources/.
- La hadal Khadka Tooska ah ee Gunnooyinka Shacabka Oregon wixii su'aalo ah ee ku saabsan gunnooyinka iyo ku biiridda: 1-800-520-5292.

4. Sharciga lagu taliyey ma khuseeyo saamaynta wax tagay.

Goorta iyo haddii ay noqoto sharci jira, qoysasku waxay weli haystaan wakhti ay doorashada saxda ah ugu samayn karaan dadkooda. Iminka, waxaad ka dhiiban kartaa taladaada adiga oo adeegsanaya nidaamka tal bixinta shacabka taladan.

Waxaa maxay “Kharashka Shacabku” oo maxaa baddali kara?

Kharashka Shacabku waa tibaax ay isticmaalaan saraakiisha laanta socdaalku oo ay u adeegsadaan dadka ku tiirsan kaalmada lacageed ee dawladda, sida Kaalmada Kumeel Gaadhka ah ee Qoysaska Baahan (TANF), si ay u taageeraan naftooda. Noqoshada “kharashka shacabku” waxay saamayn kartaa u qalmidda qofka ee kaadhka cagaaran ama fiisaha.

Sida uu dhigayo sharciga iminku, kaliya gunnooyinkan ayaa *keeni kara* in lagu go'aamiyo kharash shacab.

- Dakhlaga Sugnaanta ee Dheeraadka ah (SSI)
- Kaalmada Kumeel Gaadhka ah ee Qoysaska Baahan (TANF)
- Daryeel muddada dheer ee xarunta ay dawladdu kharashkeeda bixiso

Dawladda federaalka ahi waxay ku talinaysaa in wax ka baddal lagu sameeyo qeexitaanka kharashka shacabka si uu ugu yeesho cawaaqib xagga socdaalka ah dadka soo-galaytiga qaarkood kuwaasi oo hela Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP), Caymiska Caafimaadka Oregon (OHP), iyo adeegyada kale.

Wax ka baddalkani waxa uu samaayn karaa qoysas badan oo doonaya in degganaansho la siiyo, laakiin weli waa talo uun. Macluumaad dheeraad ah ka ogow qorshahan la damacsan yahay adiga oo booqanaya:

protectingimmigrantfamilies.org.

Waxa ay tahay inaad ogaato:

Shuruucdu weli is may baddalindadka dalbanaya kaadhka cagaaran kuwaas oo waraysiga degganaanshahooda ka dhici doono Maraykanka. Badi gunnooyinka shacabka (sida daryeelka caafimaadka, kaalmada raashinka, WIC, kaalmada guryaynta, iyo kuwa kale oo badan) LOOMA aqoonsana inay yihiin kharash shacab. Sharcigoodu wuu ka duwan yahay dadka fiisayaasha dalbanaya ee Maraykanka dibaddiisa jooga. Kala sheekeyso looyar socdaalka ku takhasusay si aad macluumaad badan uga ogaato.

Sharciga kharashka shacabku MA khuseeyo noocyo badan oo dadka soo-galaytiga ah.

Qaxootiga, dadka sida kaadhka cagaaran, dadka ka badbaaday fal danbiyeeyada qaar, iyo dadka soo-galaytiga ah oo kale waxaa laga soo reebaa sharcigan kharashka shacabka iyada oo aan loo eegeynin isbaddalka lagu taliyay. Hoos ka eeg liiska dhammayskatiran ee qaybaha laga soo reebay.

Liiskan dadka soo-galaytiga ahi KUMA waajibto shuruucda Kharashka Shacabku.

Qaybahan waxaa laga soo reebaa baadhitaanka kharashka shacabka sida uu dhigayo sharcigu waxaana sii socon doonta in laga reebo marka sharciga cusub uu dhaqangalo.

- Qaxootiga iyo Magangalyo Doonka
- Dadka sita Kaadhka Cagaaran oo dalbanaya dhalashada Maraykanka.
- Dadka qaar xabsiga hore looga sii daayey Maraykanka.
- Dadka buuxiya foomka dhawrista ee Xeerka Tacaddiga Dumarka Lagula Kaco (VAWA)
- Dadka soo-galaytiga ee leh waalid Maraykan iyo waalid Aasiyaan ah
- Qofka ka tirsan ciidanka jiidda hore jooga ama xubnaha ciidanka kaydka ah, xaaskooda iyo carruurtooda
- Dadka sita fiisayaasha T ama U (Dadka ka badbaaday tahriibta, tacaddiga guriga dhexdiisa, ama faldanbiyeedyada kale)
- Carruurta soo-galayti gaar ah
- Dadka kasoo galay Kuuba, Nikaragua, ama Heyti
- Dalbadayaasha duwaanka (Maraykanka gudihiiisa kahor 1972)
- Carruurta soo-galaytiga ah qaarkood ee Maraykanka kusoo galay waalid korinaya

Waxa aad samayn kartid:

Ha uga tanaasulin gunnooyinka qoyskaagu u baahan yihiin wixii kutiri kuteenka ah ama cabsi.

Shuruucda cusub weli may dhaqangelin waxaana dhici karta inayna adiga ku saamaynin. Waxaad heshaa talo si aad doorashada saxda ah ugu dooran karto naftaada iyo qoyskaaga.

Macluumaadka la soco oo ka hadal isbaddalada dhabta ah. Haddii shuruucdu isbaddasho, waxaad heli doontaa wakhti aad tallaabo ku qaado kahor inta ayna dhaqangelin. Kala soco oregonimmigrationresource.org iyo protectingimmigrantfamilies.org wixii warar ah ee ugu danbeeyay iyo sidii codkaaga loo maqli lahaa.

Waxaad ka heleysaa looyar ku takhasusay socdaalka halkan: [oregonimmigrationresource.org/resources/La hadal Khadka Tooska ah ee Gunnooyinka Shacabka Oregon](http://oregonimmigrationresource.org/resources/La-hadal-Khadka-Tooska-ah-ee-Gunnooyinka-Shacabka-Oregon): 1-800-520-5292.

Macluumaadka ay bixiyeen ururka Ilaali Qoysaska Soo-galaytiga Oregon (Protect Oregon's Immigrant Families): kuwaas oo ah iskaashato ay kamid yihiin Sababta Oregon (Causa Oregon), Shaybaadhka Sharciga Cusboonaysiinta (Innovation Law Lab), Dalladda Laatinada (Latino Network), Bangiga Cuntada Oregon (Oregon Food Bank), iyo Kooxda Qareenada Qaranka ee Portland (National Lawyers Guild Portland).